

Dadka Haysta Wisconsin Medicaid Yuusan Idinka Dhicin Kaarka Caafimaadka

(Wisconsin Medicaid Members
Keep Your Health Benefits)



Haddii aad haysato kaarka caafimaadka ee Wisconsin (sida BadgerCare Plus, Medicaid, ama MAPP), waxaa khasab kugu ah **cusbooneysiin ah sannad kasta hal mar.**

Waxa la Filayo Wakhtiga Cusbooneysiinta

1



Qiyaastii laba toddobaad ayaa laguugu soo dirayaa waraaqaha ka hor bisha cusbooneysiinta. Tusaale ahaan, haddii cusbooneysiintu ku beegan tahay Oktoobar, waxaa ogeysiiska lagu dirayaa bartamaha Sebtembar. Cusbooneysiiso isla marka aad hesho waraaqaha si aan ceymiska lagaaga goosan.

2



Waxaa la rabaa in lagaa hubiyo macluumaadka lagaa hayo. Waxaa ka mid noqon kara faahfaahinta qoyskaaga, dakhliga, iyo ceymiska. Waxa lagu weydiin doonaa in aad caddeymo soo gudbis.

3



Xafiiska deegaanka ayaa kuu eegaya cusboonaysiinta oo ku wediin doona wixii lagaaga baahdo. Markaas ka dib, waxaa laguugu soo dirayaa waraaq laguugu sheegayo haddii ay wax is beddeleen.

Buuxinta waraaqaha cusbooneysiinta

- Sida ugu dhakhsaha badan ee lagu cusbooneysiin karo waa internetka iyo kadinka ACCESS. Gal kadinkaaga ama koonto ka sameyso barta access.wi.gov.
- Si aad waraaq ahaan ugu cusbooneysiiso, soo buuxi oo soo dir waraaqaha cusbooneysiinta.
- Waxaad ku cusbooneysiin kartaa teleefanka ama in aad u tagto xafiiska degaankaaga. Xafiis aad aadi karto ka baaro dhs.wi.gov/im-agency.
- Booqo dhs.wi.gov/renew si aad u hesho faahfaahin.



Haddii aad wakhtiga la rabo ku soo buuxin weydo waraaqaha, ceymiska ayaa lagaa goosanayaa. Waxaa heleysaa caawimaad khabiir, oo bilaash u ah cusboonaysiinta ama manaafacaadka kale ee aad heli karto [WisCovered.com](https://www.wiscovered.com). Ama, soo garaac **211** si aad ula hadasho shaqaalaha deegaanka.

Su'aalaha iyo Jawaabaha Cusbooneysiinta

Waa maxay cusbooneysiintu?

Markii ugu horreysay ee aad manaafacaadka soo codsatay, waxaad soo gudbisay faahfaahin ku saabsan qoyskaaga, dakhliga, iyo ceymiska. Si aad u ogaato haddii aad ceymiska haysan karto, waa in aad cusbooneysiiso sannad kasta. Habkaas ayaa la yiraahdaa cusbooneysiinta.

Goorma ayaan cusbooneysiinayaa?

Taariikh cusbooneysiin ayaa laguugu sameeyey barnaamijyada aad ku jirto mid kasta. Waa la isugu kaa toosinayaa haddii ay suurtowdo, laakiin waxaa laga yaabaa inaysan isku mid ahayn. Waxaad taariikhaha kama-dambeysta ka heli kartaa kadinkaaga ACCESS. Gal kadinkaaga access.wi.gov ama isticmaal abka MyACCESS. Haddii aadan ku lahayn koonto, ka sameyso access.wi.gov si aad manaafacaadka uga maareyso mar kasta iyo meel kasta.



Maxaa kuugu xigi doona?

Qiyaastii laba toddobaad ka hor bisha cusbooneysiinta, waxaa lagu soo dirayaa waraaqaha. Waraaquhu waa macluumaadka aad ku xaqiijineyso ama cusbooneysiineyso si loo ogaado waxa aad xaq u leedahay. Nooca kambuyuutarka lagu sameyn karo waxaa laga heli karaa kadinkaaga ACCESS.

Haddii aan u maleynayo in aanan xaq u lahayn, maxaan u cusbooneysiinayaa?

Waxaan kugula talineynaa in aad sameyso cusbooneysiinta oo aan go'aan ka soo gaarno. Waxaa jira waxyaabo badan oo ka mid ah habraaca la soo maro. Tusaale ahaan, haddii ay ilmo kuu joogaan, waxaa laga yaabaa in ilmaha ceymis la siiyo xataa haddii aysan waalidku xaq u lahayn.

Ka warran haddii aan soo cusbooneysiin waayo wakhtiga la iga rabo?

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aad cusbooneysiin sameysato ilaa saddex bilood ka dib bishii cusbooneysiinta. Kala hadal xafiiska deegaankaaga si aad u ogaato haddii ay suuroobesyo. Haddii aysan suuroobeyn, soo garaac [211](https://www.211.org) ama booqo [WisCovered.com](https://www.WisCovered.com) si laguugu caawiyo in aad si kale u hesho ceymis.

Maxaa kale oo ay tahay in aan ogaado?

Ha dibdhigan daryeelka caafimaadkaaga! Marka aad haysato kaarka caafimaadka, waxaad ku doonan kartaa daryeel caafimaad. Tusaale ahaan, kaarkaaga BadgerCare Plus, waxaad ku heli kartaa tallaallada, baarista guud ee caafimaadka, iyo qaadashada daawada. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeegyada caafimaadka dhimirka.